



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka [Benefits.Ohio.Gov](https://www.Benefits.Ohio.Gov),
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga [JFS.Ohio.Gov/County](https://www.JFS.Ohio.Gov/County).

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga [Medicaid.Ohio.Gov](https://www.Medicaid.Ohio.Gov).

Ohio

Department of
Medicaid

Barnaamijka Caawinada Caymiska Medicare (Medicare Premium Assistance Program)

Barnaamijka Caawinada Caymiska Medicare (MPAP) waxuu dadka Ohio ka bixiyaa qarashka caymiska Medicare, qarashaadka la gooyo, wadaagidda caymiska iyo/ama wadaagidda bixinta.

Medicare waa barnaamij caymis caafimaad oo ay dowladdu leedahay looguna talagalay dadka jira 65 ama ka weyn, dadka qaar ka yar 65 oo naafo ah, ama dad 65 ka yar oo qaba jirada kalyaha oo heer danbe ah.

Macluumaad badan si online ah ka akhri bogga [Medicare.gov](https://www.Medicare.gov).

Haddii aad horay ugu jirtay Medicare iyo Ohio Medicaid, oo aad jeclaan lahayd warbixin dheeri ah oo ku saabsan Barnaamijka Caawinada Caymiska Medicare:

- booqo barta internetka ee [Medicaid.Ohio.Gov/MPAP](https://www.Medicaid.Ohio.Gov/MPAP),
- laxariir Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska, ama
- wac Laynka Tooska ee Macaamiisha Medicaid oo ah (800) 324-8680.